*Somali Studies: A Peer-Reviewed Academic Journal for Somali Studies,*
*Volume 9, 2024, pp. 126-147*

# Kaalinta Caabuqa Covid-19 ee Muujinta Goldaloolooyinka Xeerarka Soomaaliya: Darsid Naqdin iyo Falanqeyn

Cali Sh. Aadan Yuusuf 'Cali Soomaali'


### *Mucda Qoraalka (Abstract)*

*Caabuqa Covid-19 wuxuu ahaa safmar wax ka badalay habnololeedka dunida, wuxuuna soo saaray gaabiska dunida ee dhanka adeegyada sida caddaaladda, caafimaadka, waxbarashada iwm. Meelaha xanuunka Covid-19 uu saamaynta wayn ku yeeshay waxaa ka mid ah dhanka xeerarka, maadaama xeerku uu yahay agabka dowladaha ee loo isticmaalo xakamaynta bulshada "Social control", beddelitaanka habnololeedka bulshada "Social change" iyo xalinta murannada bulshada "Social dispute settlements".*

*Daraasaddan kooban, oo ah naqdin iyo falanqayn ee loo isticmaalay halbeegga falanqaynta naska "descriptive analytical method", waxay muujinaysaa in xeerarka Soomaaliya aysan u diyaarsanayn ka jawaabidda iyo xallinta faldembiyeedyada, murannada iyo xuquuqaha ka dhashay aafada Covid-19, ayna tahay in laga fekero 'xalal xeereed fog' oo ku dhisan sii odorasidda mushkiladaha.*


**Erayada Sheegan:** Covid-19, xuquuqda dastuuriga, fulinta heshiisyada, xaaladda degdegga ah, xeerarka Soomaaliya.

## I. Hordhac

Safmarka Covid-19 oo soo shaacbaxay Diisambar 2019, waxa lagu tilmaamay mid ka mid ah dhibaatooyinka ugu wayn ee caalamka la soo darsay muddooyinkii u dambaysay. Wuxuu carqaladeeyay waddamada caalamka dhinacyada caafimaadka, bulshada, caddaaladda, dhaqaalaha iyo nolosha siyaasadeed.

Soomaaliya waxay 16 Maarso 2020, ku soo biirtay waddamo badan oo la tacaalaya Covid-19, kadib markii Wasaaradda Caafimaadka Soomaaliya ay ku dhawaaqday xaaladdii ugu horaysay ee dalka lagu arkay.[1] Wasaaradda Shaqadda iyo Arrimaha Bulshaddu, iyadoo tixraacaysa waraaqda wasaaradda caafimaadka, waxay soo saartay waraaqda ku taariikhaysan 19/03/2020 ujeedkeedu ahaa in la joojiyo soo xaadiritaanka shaqadda, ciddii looga maarmi waayo ma ahee. Covid-19 ma saamayn oo kali ah caafimaadka, dhaqaalaha iyo waxbarashada; sidoo kale wuxuu saameeyay dhinacyada caddaaladda, wuxuuna reebay raadad sharci.

Caabuqa Covid-19 wuxuu reebay saamayn badan oo taabanaysa dhinacyada sharciga. Wuxuu saameeyay xuquuqda aasaasiga ah ee muwaadinka ee lagu dhawray Cutubka 2aad ee Dastuurka kmg. Wuxuu soo saaray goldaloollada sharci ee ka jira isu-dheellitirka ilaalinta xuquuqda muwaadinka iyo isticmaalka xakamaysan ee sharciyadda. Wuxuu sidoo kale soo saaray dulduleellada dhawrista mabaadiida helitaanka caddaaladda “Access to justice principles” iyo helitaanka halbeegyo la jaanqaadi kara musiibooyinka, iyo habraacyada dacwadaha madaniga iyo ciqaabta. Sidoo kale wuxuu soo saaray goldaloollooyinka xeer ee la xariira fulinta heshiisyada shaqada, kirada, ganacsiga imw ee xilliyada ay jiraan musiibooyinka ka baxsan gacanta Aadanaha sida Covid-19; sidoo kale dhinacyada ciqaabta ee xakamaynta baahinta Caabuqa Covid-19 iyo caddaymaha; iyo sidoo kale Dhinacyada maalgashiga shesheeye.

## II. Dabeecadda Qaanuuneed ee Caabuqa Covid-19

Ma jirto aragti sharci oo midaysan oo la isku raacay in lagu dabaqo caabuqa Covid-19, balse waxaa jira doodo ka socday dabeecadda qaanuuneed ee la siinayo Caabuqa Covid-19. ([2]) Qeexid kasta oo la siiyo Caabuqa Covid-19 waxaa ka dhalanaya raadad qaanuuneed leh saamayn ballaaran. Waxaa jiro Dowlado qaatay go'aan ah in la saaro dabeecad qaanuuneed, sida Ciraaq oo go'aan ay kasoo saartay ah inuu yahay musiibo dabiici ah [(3)]. Waxaa la isku raacsan yahay in Caabuqa Covid-19 uu ka baxsan yahay gacanta Aadanaha, uuna soo hoosgelayo aragtida Qaanuunka Madaniga ah ee loo yaqaano "Masiibooyinka aan la celin karin" ([4]) "external causes", sida laga dheehan karo qeexitaanada la siiyay iyo digniinaha laga soo saaray intaba. Doodaha fuqahada qaanuunka ee la xariira dabeecadda cudurkaan waxay ku soo ururayaan labo aragti, oo kala ah:

### A. Musiibo aan la Celin Karin (Force Majeure)

**Musiibo aan la celin Karin:** waa fal ka baxsan gacanta Aadanaha oo aanan la filan karin dhicitaankiisa sida dhulgariirka, dabka iyo musiibooyinka dabiiciga ah.

Si loo xaqiijiyo inay jirto xaaladaas waxaa qasab ah in la helo Saddex tiir:

- In falka dhacay uu yahay mid ka baxsan gacanta Aadanaha.
- In falka dhacay aanan la filan karin dhicitaankiisa.
- In wixii lagu heshiiyay ama la qabanayay uu falkaasi ka dhigo wax aanan la fulin karin.

Fuqahada qabto in Covid-19 uu yahay "Force Majeure" oo ah musiibo aanan la filan karin, lagana hor tagi karin, sidaas darteedna ay tahay in la raaco Axkaamta ku dabaqmayso, haddii la raaco doodooda waxaa ka dhalanaysa in aanan cidna loo haysan wixii culays ah ama waajib ah oo

uu reebay in la sameeyo Caabuqa Covid-19[5]; sidaas darteed, heshiisyadu waxay isaga dhammaanayaan si iskood ah, umana baahno heshiis, mana jirto dhinacyada cid qaadaysa culeyskii dhashay.

## B. Duruufaha aan la Filanayn (Emergency Situation)

Duruufaha aan la filanayn: waa fal ka baxsan gacanta Aadanaha oo aanan la filan karin dhicitaankiisa sida musiibooyinka dabiiciga ah, kaas oo ka dhigaya waajibka ama heshiiska mid fulintiisa ay ka dhalanayso culays wayn ama khasaare hal dhinac.

Si loo caddeeyo duruufaha aan la filanaynin waa in la helaa saddex tiir:

1. In duruufta ay tahay mid guud. Hadii xaaladda ay tahay mid gaar ku ah dhinac ama koox, sida dab ka kacay meelo gaar ah ama xanuun dad gaar ah, ma aha mid ku dabaqmaysa xaaladaan.
2. In duruufta ay tahay mid aan la filan karin waqtiga heshiiska: inkasta oo shardigaas fuqahada qaarkood ay dood ka qabaan ah in filasho ay dhici karto balse xaddigeeda aan la qiyaasi karin marka loo eego shaqsiga caadiga ah, haddana, waxuu asal ahaan ku fadhiyaa shardigaas sare mabda' wayn oo ka mid ah Xeerka Madaniga Soomaaliyeed (XMS) kaas oo ah dhowrista "Sugnaashaha Mucaamalaatka/ Contracts Stability".
3. In waajibka ama heshiiska fulintiisa ay ka dhalanayso culays ama khasaaro. Fuqahada qabta doodaan waxay qabaan in Covid-19 uu yahay mid waajibaadka iyo heshiisyada in la fuliyo aanan ka dhigayn mustaxiil, laakiin waajibaadka iyo heshiisyada ka dhigaya kuwo ay adag tahay fulintoodu, sidaas darteedna ay tahay in la dabaqo aragtida Xeerka Madaniga ah ee ku aadan duruufta aan la filanaynin, taas oo keenayso khasaare-qayb, Garsooruhuna wuxuu mar kasta tixgalinayaa Mabd'a Xeerka Madaniga ee loo yaqaano isu celceliska khasaaraha dhaqaale[6].

## 2. Aragtida Xeerka Soomaaliya ee Dabeecadda Covid-19

Xeerka Madaniga Soomaaliya wuxuu kaga hadlay Qodobka 162[aad] sabab ka baxsan doonista Aadanaha ayna keenayso in la fulin waayo magdhawga; wuxuuna xusay in ay noqon karto 'duruuf aan la filanaynin' (Emergency situation) ama 'Musiibo aan la filaynin' (Force Majeure); balse ma samayn wax qeexitaan ah oo ku saabsan waxa laga wado labadaas xaaladood; sidoo kale ma kala qaadin xaaladahaas iyadoo Fiqhiga Qaanuunka iyo xeerarka kale ay kala qaadaan; balse Qodobka 144/2[aad] XMS ayaa xusay haddii ay imaadaan duruufo aan filaynin, isla markaasna ay gaarsiiyaan dhinac khasaare in Garsooruhu uu dabaqayo mabda'a loo yaqaano isu-celceliska khasaaraha dhaqaale, taas oo ka dhigan haddii la qaato aragtida Covid-19 ee duruufaha aan la filaynin (emergency situation) ay tahay in la dabaqo mabda'a isu-celceliska khasaaraha dhaqaale ee dhinacyada, taas oo Garsooraha loo siiyay awoodda ka go'aan gaarista xaddiga, awoodaasna ay tahay mid ka mid ah nidaamka guud ee dhinacyada aysan ku heshiin karin wax ka duwan sida ku faah-faahsan Qodobka sare.

Sidaas darteed, ma cadda xaalad gaar ah oo lagu qeexo Covid-19, marka laga soo tago in uu yahay sabab ka baxsan doonista Aadanaha ee ku xusan Xeerka Madaniga(7), taas oo ka dhigan in ay jirto mushkilad qaanuuneed la xariirta go'aan ka gaarista dabeecadda Covid-19 ee dabaqaadda Xeerka Soomaaliga ah iyo xukunnada Garsoorka maadama ay kala duwan tahay saamaynta Caabuqa ee dhinacyada nolosha iyo heshiisyada, aysanna jirin fasiraad sharci, xeer gaar ah iyo go'aan mid ah oo laga soo saaray musiibadaas, Xeerkanna uusan si waafi ah u kala qeexin labada aragti ee ka baxsan doonista Aadanaha.

## III. Saamaynta Covid-19 ee Dhinaca Xuquuqda Aasaasiga ee Muwaadinka Iyo Goldaloolooyinka Sharci

Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka ee KMG ah waa hagaha qaabnololeedka bulshada, si guud. Cutubka 2aad ee Dastuurka KMG ah waxaa lagu dhawray Xuquuqda Aasaasiga ah ee Muwaadinka Soomaaliyeed. Xuquuqda muwaadinka ee lagu ilaaliyay Dastuurka waxaa ka mid ah xorriyada kulanka, bannaanbaxa, cabashada iyo codsi wadareedka. Tusaale Qodobada. 20aad, 21aad ee Dastuurku waxay tibaaxayaan:

Qodobka.20/1aad ee DKMG JFS: *Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu abaabulo, kana qaybgalo kulammo ama bannaabax oo si xasilooni ah cabasho loogu muujinayo, iyada oo aan oggolaansho loo baahnayn*.

Qodobka. 21/1aad DKMG JFS***:*** *Qof kasta oo si sharci ah ku degan dhulka Jamhuuriyaddu wuxuu xaq u leeyahay in uu si xor ah u degi karo, ugu dhex socon karo meel kasta oo dalka ka mid ah, kana bixi karo.*

Xuquuqdaas iyo kuwa kale oo muwaadinku leeyahay, kuna xusan Cutubka labaad ee Dastuurka, ayaa ah kuwa uu saameeyay Covid-19, oo ay qasab noqotay in uusan helin muwaadinku sababo la xariira caafimaadka guud iyo nidaamka guud.

Xuquuqda aasaasiga ah ee muwaadinka ee ku xusan Cutubka 2aad ee Dastuurku, sidoo kale, waa kuwo ku xusan heshiisyo caalami ah, sida Cahdiga xuquuqda Madaniga ah[(8)], iyo baaqa caalamiga ah ee xuquuqda Aadanaha[(9)]. Fasiraadda xuquuqdaas waxaa la tixgalinayaa Xeerarkaas caalamiga ah sida ku xusan Dastuurka Soomaaliya[(10)]. Sidoo kale Dastuurka wuxuu waajibanayaa in aysan ku filnayn in la ixtiraamo xuquuqda aasaasiga ah ee muwaadinka oo kali ah, balse ay waajib ku

tahay Dawladda, heer kasta, in ay qaado tallaabooyin lagu xaqiijinayo xuquuqdaas[(11)].

Go'aan kasta oo dawladeed ha ahaado mid lagu xaddidayo xuquuqda aasaasiga ah ee muwaadinka ama mid kale, waxaa waajib ah in uu yeesho tilmaamaha ku xusan Dastuurka KMG, gaar ahaan Qodobka. 33[aad]:

"*Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in go'aammada ka soo fula maamullada ay ahaadaan kuwo ku dhisan sharci, maangal ah, go'aan-ka-gaaristoodana loo maray hannaan caadil ah*."

Qodobkaan wuxuu go'aan kasta oo maamul ee lagu xaddidayo xuquuq ku xiray:

- Inuu yahay mid sharci ku dhisan "lawful".
- Maangal yahay "reasonable"
- go'aan-ka-gaaristoodana loo maray hannaan caaddil ah "Conducted in a procedurally fair manner"

Mabaadiidan waxay la mid yihiin mabaadii' kale oo caalami ah ee laga rabo go'aan maamul sida:

- In go'aanku yahay mid ku habboon arrinka laga soo saaray (proportionality princple).
- La tashiga cidda ay khuseeyaan go'aannadu (the right to participate/the duty to consult**).**
- Ilaalinta filashada muwaadiniinta (legitimate expectations).

Si loo xadido Xuquuqda Aasaasiga waxaa qasab ah in lagu xaddido Sharci gaar ah, sharcigaas oo leh astaamaha ku xusan Dastuurka[(12)]. Sidoo kale, waxaa la xadidi karaa marka ay jirto xaalad degdeg ah oo lagama maarmaan u ah in la xaddido xuquuqdaas, sida ku xusan Dastuurka oo kali ah[(13)].

Goldaloolooyinka sharci ee uu soo saaray Caabuqa Covid-19 ee la xariiro xuquuqda muwaadinku, waxay yihiin in uusan jirin “xeerka xaaladda degdegga” oo nidaamin lahaa xaaladaan oo kale markii ay timaado, Sidoo kale, waxaa meesha ka maqan “xeerka caafimaadka guud” oo asna nidaamin lahaa habka ay tahay in loo dhaqmo marka xaalad halis caafimaad ah ay dhalato. La’aanta xeerarkaas waxay meesha ka saaraysaa mabda’ wayn ee saldhigga u ah ku dhaqanka sharciga “the legality principle”

## 2. Saamaynta Covid-19 ee Mabaadiida Helitaanka Caddaaladda iyo Habraacyada Dacwadaha Madaniga iyo Ciqaabta

Xuquuqda aasaasiga ah ee muwaadinka ee lagu dhawray Cutubka 2[aad] ee Dastuurka KMG waxaa ka mid ah, xuquuqda eedaysanaha ee ku xusan Dastuurka ee ka hadlaya xaqa is difaaca[(14)], waana kuwa ka mid ah mabaadiida helidda marinka caddaaladda “Access to justice principles”. Waxaa ka mid ah mabaadiidaas in dacwadda qofka lagu dhagaysto fadhi dadweynaha u furan marka aysan jirin xaaladaha xeerku xaddiday.

Qodobka 34/[2aad] DKMG: *Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu helo garsoor madaxbannaan, caaddil ah, aan eex lahayn, laguna qaadayo maxkamad dadweynaha u furan, laguna galo waqti macquul ah, ama golihii kale ee awood go’aan-gaaris ah u leh*.

Q. 35/5[aad] iyo 8[aad]:

- *Qof kasta oo la xiraa wuxuu xaq u leeyahay in 48 saac gudahooda lagu horgeeyo maxkamad awood u leh.*
- *Eedaysanuhu wuxuu xaq u leeyahay in uu goobjoog ka ahaado dacwaddiisa.*

Mabaadiida daahfurnaanta maxkamadda iyo in lagu qaado hool dadwaynaha u furan waa kuwa ugu muhiimsan maxkamadaynta sida ku

xusan qodobbada sare iyo Q.107aad ee Dastuurka waana waxa loo yaqaano "Fair Trail Principles" oo ah xuquuq caalami ah[15].

Sidoo kale, waqtiga macquulka ah ee ku xusan Q.34aad ee lagu dhagaysanayo dacwadda waxaa sii xaddiday Xeerka Habka Ciqaabta Soomaaliyeed (XHCS)[16] oo ku xusay in aan dib loo dhigi karin dhegaysiga garmaqalka maxbuuska in ka badan toddobo maalin.

Xanuunka Covid-19 wuxuu meesha ka saaray mabaadiidaas ay waajibka ahayd in la dabaqo, taas oo ah saamayn waawayn ee mabaadiida xeerka, inkastoo isla Xeerka Habka Ciqaabta[17] uu ku daray mabda' ahaan sababaha loo xiri karo fadhiga dacwadda in ay ka mid tahay sababo caafimaad dartood, balse ma sheegin Habraacu maqnaansho ama hab ka baxsan joogitaanka eedaysanaha ee maxkamadda in lagu qaadi karo dacwadda.

Haddaba sida ka muuqata qodobbada hore ee Dastuurka oo sheegaya in la hor geeyo eedaysanaha maxkamad, uuna iska difaco maxkamadda horteeda, waa arin ay ka dhalanayso haddii la samayn waayo baabi'itaanka dacwadda, sida ku xusan Xeerka Habka Ciqaabta[18], oo waajibinaya in ay joogaan garsooraha, eedaysanaha –xaaladda ku helitaanka ciqaabta- iyo Xafiiska Xeer-ilaaliyaha, qareenka xaaladaha ay waajib yahay in eedaysanuhu uu leeyahay qareen ka difaaco maxkamadda horteeda[19] marka laga rabo eedaysanayaasha maqana ah ee waarankoodu dhaqangeli waayay kadibna la baafiyay.([20])

Haddaba, su'aasha la is waydiin karo waxay tahay, joogitaanka maxkamadda ma mid jismi ahaa mise wuxuu noqon karaa mid muuqaal ah, sida muuqaalka Zoom-ka ee dacwadaha lagu galay xilliga Covid-19? Sow ma ahayn Xeerka in uu ku baraarugo in ay jiri karto mar aysan suurtagal ahayn joogitaanka dhinacyada dacwaddu?

Sidoo kale, wuxuu saameeyay Covid-19 habraacyada racfaanka iyo cabashooyinka oo sharcigu u jaangooyay muddo kooban oo ah “30 beri” iyo duritaanka ciqaabta oo ah 30 ama 15 beri sida Xeerka Habka Ciqaabta ku cad[21].

Xeerka Habka Madanigu kama hadlin waxa dhacaya haddii lagu soo gudbin waayo racfaanka ama cabashada muddada sharciga ah, iyo in ay jiraan fidin muddadaas lagu samayn karo haddii ay imaadaan waxyaabo ka baxsan dhinacyada, balse Xeerka Habka Ciqaabtu wuxuu xusay haddii mudooyinkaas lagu soo gudbin waayo duridda waxaa ka dhalanaya oo ah in aan la aqbali karin duriddaa[22].

Waxaa xusid mudan in Xeerka Habka Ciqaabtu sheegay, Maxkamadda Racfaanka iyo Maxkamadda Sare ay fidin karaan muddada haddii ay jiraan sababo ka baxsan awoodda eedaysanaha balse aan loo kordhin karin Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka[23], halka Xeerka Nidaamka Garsoorku uu xusay mabda’ ahaan fidinta Maxkamadda Sare ee duritaannada marka ay ka baxsan tahay iraadada Aadanaha, balse uusan faahfaahin xaaladaas[24].

Haddaba waxaa is waydiin mudan, haddii ay suurtageli wayday, Caabuqa Covid-19 ama musiibo awgeed, ma la kordhin karaa muddada ku xusan Xeerka Habka Madaniga Soomaaliyeed (XHMS) maadaama Xeerku uusan xusin?

Xeerka Habka Madaniga Soomaaliyeed wuxuu ka hadlayaa muddooyinka[25], wuxuuna si cad u sheegayaa in wixii muddo ah, oo uu Sharcigu xaddiday, in garsooruhu uusan waxba ka beddeli karin oo ay yihiin sida uu sharciga u xadiday. Waxaa halkaas laga fahmayaa in aan waxba laga beddeli karin muddooyinka racfaanka iyo cabashooyinka ah ee waqtigoodu dhacay sababo ka baxsan dhinacyada, balse waxaa sidoo

kale la is waydiin karaa si muddooyinkaas sharcigu xaddiday u dhacaan, ma tahay waajib in ay maxkamaddu furnaato?

Inkastoo uusan jirin qodob si qayaxan u sheegaya, haddana waxaa laga fahmi karaa Xeerka Habka Madaniga iyo Xeerka Habka Ciqaabta oo ka hadlaya sida loo xisaabinayo muddooyinka[26], waxayna xuseen in muddada ku aaday maalin fasax ah aan la xisaabinayn ee ay ka bilaabanayso maalinta shaqada ee ka dambayso, waxaana qodobkaas laga fahmi karaa in muddo kasta oo la xisaabinayo ay waajib tahay in maxkamadda furan tahay, taas oo ka dhigan in muddooyinkii ay xirnayd maxkamaddu Caabuqa Covid-19 dartiis aan la xisaabinaynin racfaannada iyo cabashooyinka, waana arin loogu laabanayo go'aannada maxkamadda lagu xiray dhowr jeer.

## 3. Saameynta Covid-19 ee Fulinta Heshiisyada Madaniga ah

Heshiisku waa mid ka mid ah waxyaabaha qofka ku qasba fulinta shayga. Heshiiska iyo axkaamtiisa waxaa lagu sharxay Xeerka Madaniga Qodobada 88[aad] ilaa 158[aad]. Waxaan fiirin doonaa, si kooban, fulin la'aan ka dhalata heshiiska iyo xaaladaha keena.

Heshiisyada waxaa haga labo mabda' oo waawayn oo uu xusay Xeerka Madaniga Soomaaliyeed, waxayna kala yihiin:

- Mabda'a fulinta heshiiska si niyaad wanaag ah "The Good Faith Princple'. Mabda'an waa mid caalami ah oo dhamaan heshiisyada nooc kasta oo ay yihiin laga rabo, dhanka fulinta, qoraalka, gelintaankooda iyo fasirkoodaba; wuxuuna waajibiyay Xeerka Madaniga Soomaaliyeed in heshiisyada loo fuliyo si niyad wanaag leh[27]. Sidoo kale, heshiisyada ay dhinacyada ka yihiin shaqsiyaadka guud ayay ku tahay waajib, waana mabda'a guud

sida uu xusay Xeerka Caalamiga ah ee nidaamiya heshiisyada "The Vienna Convention on the Law of Treaties [28] (VCLT).

- Mabda'a "Heshiisku waa xeerka labada heshiiyay, lama burin karo, lama badali karo, ilaa is-afgarad labada dhinac ma ahee ama sababo uu xeerka jideeyay[29].

  Sidoo kale, Xeerka Madaniga Soomaaliyeed ayaa lagu xusay haddii ay timaaddo duruuf aan la filan karin, taas oo ka dhigaysa heshiiska mid dhib ku ah daynqabaha, gaarsiinaysana khasaare, in garsooraha ay u bannaan tahay isu dheellitirka labada danood ee dhinacyada[30].

  Xeerka wuxuu sharaxay mabda'a guud ee heshiisyada iyo tiirarka laga rabo duruufaha aan la filanayn (emergency situation) marka ay timaado iyo doorka garsooraha ee ah in uu isu dheellitiro danaha labada dhinac waxa loo yaqaano "khasaare qayb dhaqaale", waana mid ka dhigaysa haddii Caabuqa Covid-19 loo aqoonsado in uu yahay (emergency situation) in dhinacyadu ay khasaare qaybsanayaan khasaaraha fulin la'aanta heshiisyada, awoodda isu dheellitirka culeyskana ay leedahay maxkamaddu.

Sidoo kale Xeerka Madanigu wuxuu ka hadlay in dhinacyadu aysan ku dari karin heshiiska marka ay galayaan, in haddii ay timaaddo xaaladda (emergency situation) dhinacna uusan qaadi karin masuuliyad gaar ah, wuxuuna xeeriyay in haddii lagu heshiiyo arrinkaas uu baadil yahay[31], waana arrin uu kaga duwan yahay Xeerka Madaniga ee Faransiiska.

Sidoo kale, Xeerka Madaniga Soomaliyeed ayaa ka hadlay haddii fulinta heshiiska waajibka ku ah ay noqoto mid aan suurtagal ahayn, sababo la xariira culeys dhinac u jilcan yahay darted, in uu garsooruhu farageliyo heshiiska, iyadoo la dabaqayo mabaadiida caddaaladda[32].

Heshiisyada waajibka ku ah labada dhinacba, haddii heshiisku uu fasaqmo si iskiis ah oo la fulin waayo, Xeerka wuxuu jideeyay in xaaladdu ay ku laaban doonto ka hor heshiiska sida ay ahayd[33], taas oo ah in aan cidna waxba loo raacanayn, haddii ay suurtagali waysana uu magdhaw ka dhalanayo.

Arrimahaas hore marka lala akhriyo Qodobbada XMS oo sheegaya in daynqabaha iyo daynlaha ay ku heshiin karaan wixii raadadkii ka dhashay sabab ka baxsan iraadadiisa in la saaro daynqabaha ama ay is cafin karaan[34], waxaa noo soo baxaya:

- In Xeerku uu daawaynayo arrinta la xiriirta ‘force majeure’ balse uusan si cad u kala saarin si la mid ah xaaladda “emergency situation”. Sidoo kale wuxuu ka hadlay natiijada heshiisyada waajibka ku ah labada dhinac marka ay dhacdo fulin la’aan ka dhalatay ‘force majeure’ balse kama hadlin heshiisyada halka dhinac ku ah waajibka marka ay timaaddo duruufaha noocaas ah.
- Waxaa, sidoo kale, meesha ka baxaya heshiisyada dhashay inta uu socday caabuqa Covid-19, maadama ay yihiin kuwa la qiyaasi karay, aysanna soo galayn tiirarka aan xusnay ee labada xaaladood ee dabeecadda Covid-19.

Marka laga soo tago Xeerka Madaniga Soomaaliyeed, laguma xusin ama laguma faahfaahin xeerar badan oo ay ahayd in ay xusaan sida loola tacaalayo xaaladahan iraadada bini’adaamka ka baxsan iyo waxa ay tahay in la dabaqo si faahfaahsan maadaama ay yihiin kuwo nidaamiya arrimo gaar ah oo laga filan karay faahfaahin badan, waxaana ka mid ah Xeerarkaas, Xeerka Shaqada iyo Shaqaalaha Soomaaliyeed[35] iyo Xeerarka Canshuuraha[36] iyo Xeerka IJaarka Maguurtooyinka Ganacsiga[37], balse Xeerka Badda Soomaaliya 1989kii ayaa, sidoo kale, xusay xaalad la xariirta haddii markabka kiraysan uu joogsado sababo

"force majeure" la xariira in uu dhammaanayo heshiiskii[38], waana qayb ka mid ah saamaynta Covid-19 ee hawlaha maraakiibta.

## 4. Saamaynta Covid-19 ee Dhinacyada Awoodaha Maamulka Federaalka iyo Dawlad Goboleedyada

Wadaagga awoodaha Dawladda Federaalka waxaa loo qaybiyaa sida standard-ka iyo curfiga dastuuriga yahay ilaa saddex heer, kuwo ay gaar u leedahay dawladda federaalka "Federal exclusive powers" sida kuwa ku xusan Dastuurka KMG oo u dhigan sidaan[39]:

"*Awoodqaybsiga siyaasadeed iyo dhaqaale waxaa ka wada xaajoon doona Xukuumadda Federaalka iyo Dawladaha ka mid noqonaya Dawladda Federaalka Soomaaliya marka laga reebo: A) Arrimaha Dibadda; B) Difaaca Qaranka; C) Jinsiyadda iyo Socdaalka iyo D) Siyaasadda Lacagta, oo ay awooddeeda iyo mas'uuliyaddeeda yeelaneyso Xukuumadda Federaalka"*.

Sida ka muuqato Dastuurka, waxaa jira awoodo u gaar ah dawladaha xubnaha ka ah Dawladda Federaalka, balse kuwaas ma xusin Dastuurku; waxaa kale oo jiro awoodo ay tahay in la wadaago oo masuuliyaddooda ay wada leeyihiin labada heer, balse iyaguna ma xusno.

Dastuurku ma uusan cadayn awoodaha ay dawlad goboleedyadu leeyihiin si qayaxan, sidoo kale ma cadayn awoodaha la wadaagayo, balse wuxuu sheegay awoodo ay tahay in laga wada hadlo iyadoo aan cidna gaar loo siinin, waxaana ka mid ah caafimaadka. Waxayna yihiin awoodahas[40]:

a. Ilaha biyaha
b. Beeraha
c. Xannaanada xoolaha
d. Daaqa iyo seeraynta

e. Ilaalinta deegaanka iyo la dagaallanka nabaadguurka iyo
f. Caafimaadka
g. Waxbarashada
h. Xiriirinta iyo wadaxaajoodka hoggaamiye dhaqameedka, ilaalinta iyo horumarinta xeer-dhaqameedka
i. Xiriirinta culimada diinta iyo
j. Dhalinyarada

Sidaas darteed, ma cadda cidda iska leh masuuliyadda caafimaadka oo ah arrin u baahan awaamir iyo habraacyo dalka dhan ay tahay in laga fuliyo, waxayna saamayn ku yeelatay xakamaynta Covid-19. Maadaama aysan caddeyn awoodaas cidda leh, dhammaan go'aamada iyo tallaabooyinkuba waxay noqdeen kuwo aan isla socon ama aan hal qaab u fulayn; taasna waa mushkilad qaanuuneed oo u baahnayd in Dastuurku ka sii baaraandego.

## 5. Saameynta Covid-19 ee Dhinaca Ciqaabta iyo Cadaymaha.

Si loo xakameeyo Caabuqa Covid-19, Dawladda Soomaaliya waxay qaaday talaabooyin lagu ilaalinayo muwaadiniinta si la mid ah dawladaha caalamka.

Waxay ahayd 16 Maarso 2020, markii Soomaaliya ay ku dhawaaqday xaaladdii ugu horreysay gudaha dalka, intaas kadib Dawladdu waxay samaysay tallaabooyin ka hortag, waxaa ka mid ahaa:

- In la sameeyay goob karantiil ah, oo laga sameeyay Madaarka Aadan Cadde meel ku dhaw.
- Joojinta shaqada joogtada ah ee dawladda, taas oo ay wasaaradda Shaqadda iyo Arrimaha Bulshadda soo saartay 19/03/2020 ujeedkeedu ahaa in la joojiyo soo xaadirtaanka shaqada cidii looga maari waayo maahane.

- Waxaa kale oo la soo rogay dhowr go'aan oo bandow lagu galinayo Magaalada Muqdisho.

Wacyiga bulshada oo yar iyo Dawladda oo taag daran darteed, kuma filnaanin in dadku u hoggaansamaan ama Dawladda joogtayso shaqadeedii. Xaaladdan oo kale waxaa qasab ah in loo gudbo fulinta qasabka ah ee sharciga iyadoo la adeegsanayo Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed (XCS) oo wax-kabadal lagu soo kordhiyo Xeerka Ciqaabta guud, maadama ay qasab tahay badbaadinta nafta oo ah xaqa ugu muhiimsan xuquuqda aasaasiga ah.

Xeerka Ciqaabta guud waxaa ku jira qodobbo macnahooda lagu ciqaabi karo qofka faafiya xanuunka Covid-19, balse waxaa adag in tiirarka qodobbadaas "Elements" si toos ah loo helo ama ayba adag tahay in la sugo.

Xeerka Ciqaabta waxaa ku jira qodobbo si guud uga hadlaya sababidda musiibo iyo cuduro halis ah. Sidoo kale, wuxuu dambi ka dhigay u hoggaansanwaaga agab looga hortagi lahaa musiibo oo ay waajib ahayd in la isticmaalo. Qodobbadaas waxay u qaybsamaan labo:

**Midda koowaad**, waa in falkaas sababidda ah uu yahay mid kas ah, oo ku dhisan ujeedo ogaal iyo rabitaan, sida ku cad kala saaridda ujeedooyinka falka[(41)]. Qaybtaas waxaa hoos gelaya qodobbada hoose oo ka mid ah Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed[(42)].

| **Qodobka** | **Ujeeddada** | **Ciqaabta** |
|---|---|---|
| 330 XCS | Sababid musiibo si kas ah | 3-10 sano |
| 331 XCS | Diidmo ka hortagis musiibo | 1-5 sano |
| 334 XCS | Faafin xanuuno si kas ah | Dil |

**Midda labaad,** waa in falalka sababida musiibada uu ka dhashay gaabis iyo taxadar la'aan ka timid qofka sameeyay, waana qaybta ujeedka loo galay aysan ahayn kas mid loola qasday[43]; waxana hoos gali kara qaybtaan qodobbada hoose oo ka mid ah Xeerka Ciqaabta[44].

| Qodobka | Ujeeddada | Ciqaabta |
|---|---|---|
| 344 XCS. | Sababid musiibo si aan kas ahayn | 1-5 sano |
| 345 XCS. | Fal aan kas ahayn oo dhaliyay musiibo | Ugu badnaan 2 sano |
| 346 XCS | Diidmo ka hortagis musiibo si aan kas ahayn | Ugu badnaan Hal sano, ama ganaax kun ilaa 10 kun SHS. |
| 347 XCS | Dambi lid ku ah caafimaadka guud oo aan kas ahayn | A. 3-12 sano<br>B. 1-5 sano<br>C. 6-3 sano |

Balse waxaa is waydiin mudan si loo ciqaabo qofka faafiyay musiibo ama xanuunka Covid-19, si kas ama taxadar la'aan mid ay tahayba:

- Horta xanuunka ma yahay mid laga qaado qof mise waa mid hawada iyo meelo kale laga qaado?
- Ma ogyahay qofka laga qaaday in uu qabo xanuunkaas?
- Agabka la isticmaalo ee afxirka iyo gacmo-saabka ma yihiin kuwa celinaya in uusan gudbin xanuunku?
- Ma jirtaa goob gaar ah oo qofka qaba xanuunka lagu karantiilo, si qofkii ka baxsada loogu aqoonsado qof faafinayay cudurkaas? …

Su'aalahaas waxay soo sarayaan goldaloolooyinka ku jira Xeerka Ciqaabta marka ay joogto ku dabaqitaanka Caabuqa Covid-19 iyo in loo baahan yahay in lagu soo kordhiyo wax-kabaddel la jaanqaadaya duruufta.

## IV. Gunaanad iyo Talo Soojeedin

Daraasaddan kooban waxay iftiiminaysaa in caabuqa Covid-19 leeyahay saamayn sharci ayna jiraan mushkilado dhanka qaanuunka la xiriira una baahan xal sharciyeed. Sidoo kale, waxay si guud u iftiiminaysaa goldaloolooyinka Xeerka. Iftiimintani waxay ka qaybqaadanaysaa baraarujinta in mustaqbalka laga gaashaanto musiibo la mid ah, lagana shaqeeyo soo saaridda sharciyo daboolaya goldaloolooyinka jira.

Sidaas darteed, waxaan soo jeedinayaa:

1. In la soo saaro xeerka xaaladda degdegga, oo nidaaminaya xaaladdan oo kale markii ay timaado.
2. In la soo saaro xeerka caafimaadka guud, oo asna nidaaminaya habka ay tahay in loo dhaqmo marka xaalad halis caafimaad ah ay dhalato.
3. In wax-kabaddel lagu sameeyo Xeerka Ciqaabta iyo Xeerka Habka Ciqaabta Soomaaliyeed si ay uga jawaabaan duruufaha soo kordha, lana sii odoroso musiibooyinka iyagoo laga tusaale qaadanayo xaaladaha la soo maray.
4. In Xeerka Madaniga lagu soo kordhiyo wax-kabaddel faahfaahin iyo toosin ah, si cadna loo kala saaro duruufaha aan la filan karin iyo kuwa musiibooyinka aan la celin karin.
5. In Xeerarka Shaqada iyo Shaqaalaha iyo kuwa canshuuraha lagu soo kordhiyo axkaam ka jawaabaysa musiibooyinka marka ay dhacaan sida loola falgelayo shaqada iyo canshuuraha.
6. In si cad loogu qeexo Dastuurka awoodaha heer federaalka iyo heer dawlad goboleed, si ay u kala caddaadaan masuuliyadaha heerarka maamul, isla xisaabtanna u iman karo.

6. In qeexo habka xiriirka maamul ee heer federaal iyo heer dawlad goboleed, iyo sida amarrada Federaalku uga fulayaan dawlad goboleedyada iyo habka ay u marayaan.
7. In la sameeyo cilmibaarisyo la xariira saamaynta Covid-19 ee dhinac kasta, si looga faa'iideysto khibradii laga dhaxlay in lagu dhiso xeerarka dalka.

**Tilmaamo (Notes)**

[1] Kiiskii ugu horreeyay ee Cudurka Corona Virus oo laga helay Muqdisho, Somali National Television (SNTV), Maarso 16, 2020, https://www.youtube.com/watch?v=CxQxlRYk8wI

[2] الإلتزامات التعاقدية خلال (الجائحة) تخضع لنظريتي " القوة القاهرة" والظروف الطارئة، وسام السعايدة، 2020، لوسيل نيوز.

[3] Go'aanka Xukuumadda, 09/02/2021, Republic of Iraq, General Secretariat for the Council of Ministers. Cabinet.iq.

[4] الطبيعة القانونية لجائحة كوفيد 19 من منظور قواعد القانون العام،الدكتورة ظريفي نادية،ط.د. ضياف ياسمينة، جامعة الحقوق والعلوم السياسية، جامعة المسيلة، الجزائرص 20، مجلة المؤتمرات العلمية الدولية، العدد الخامس.

[5] *أ ثر جائحة كرونا على المدد التعاقدية والمدد القانونية في قانون المرافعات المدنية، د. علي عبد الحسين منصور الدراجي، مجلة الفنون والادب وعلوم الإنسانيات والإجتماع، العدد 54-2020، ص 134*

[6] الطبيعة القانونية لجائحة كوفيد 19 من منظور قواعد القانون العام, tixraac hore.

[7] Xeer Madaniga, Xeer N. 27, soo baxay 2 Juun, 1973.

[8] Cahdiga Xuquuqda Madaniga ah iyo Siyaasadda, soo baxay 16 Decemper 1966, dhaqan-galay 23 marso, 1976.

[9] Baaqa Caalamiga ee Xuquuqul-insaanka, Golaha guud ee QM, 1948.

[10] Qodob 40/ faqrada 2-aad ee Dastuurka KMG-JFS.

[11] Qodob12-aad ee DKMG-JFS.

[12] Q. 38aad- DKMG-JFS

[13] Q. 131/6-aad DKMG

[14] Q. 34aad, 35aad- DKMG

[15] Q. 6-aad ee Cahdiga Xuquuqda Aadanaha –tixraac hore.

[16] Q.101/2 -aad ee XHC, Xeer lam. 1, soo baxay 1/june, 1963.

[17] Q.96aad ee XHCS- tixraac hore.

[18] Qodobada 120/3/B, “1, 2”, 91 ee XHC- tixraac hore.

[19] Q. 14-aad ee xeerka nidaamka Garsoorka, Xeer lM.3, 12, june 1962

[20] Q. 128-D Wax-kabeddelka XHCS, lr 84.12.12.1972.

[21] Qodobbada 223, 249 ee Xeerka Habka Madaniga Soomaaliyeed, X.L. 19.

[22] Q. 223 XHC- tixraac hore.

[23] Q. 214/2 XHC- tixraac hore.

[24] Q. 11aad faqrada 3aad Xeerka Nidaamka Garsoorka- tixraac hore.

[25] Q.109 XHMS-tixraac hore.

[26] Qodobada 110/3 XHMS iyo 88/2XHC- tixracyo hore.

[27] Q.145-aad XMS- tixraac hore.

[28] Q. 26-aad ee heshiiska Viena ee nidaamiya heshiisyada dowladaha, la saxiixay 23 May 1969, dhaqan-galay 27 January 1980.

[29] Q. 144/1aad ee XMS- tixraac hore.

[30] Q. 144/ faqraad 2aad ee XMS- tixraac hore.

[31] Q. 144, faqrada 3aad XMS

[32] Q. 146aad- XMS-tixraac hore.

[33] Q. 156- 158aad- XMS-tixraac hore.

[34] Qodobbada 212, 213, 214 XMS-tixraac hore.

[35] Xeerka Ijaarka ma guurtooyinka ganacsiga, XL.65, 1972.

[36] Xeerarka Canshuuraha waxaan ula jeedaa wadar xeerar ah sida Canshuuraha daaraha Xl 43/1977, Xeerka Canshuuraha dowladda iyo wax-kabadalkiisa sharci lr Xl 3/1978 iyo dhammaan xeerarka kala duwan ee canshuraha.

[37] Xeerka L. M. 67/29/12/1981.

[38] Qodobada 63, 122 Xeerka Badda Soomaaliyeed, Xeer LM.5.

[39] Q. 54[aad] ee Dastuurka KMG-JFS- tixraac hore.

[40] Q.52[aad] ee DKMG- tixraac hore.

[41] Q. 24/1, A Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed, X. L.5.

[42] Qodobbada 330, 331,334 XCS tixraac hore.

[43] Q. 24/1, B, C XCS tixraac hore.

[44] Qodobbada 344, 345,346,347 XCS tixraac hore.

## Tixraac

Baaqa Caalamiga ee Xuquuqul Insaanka, meel mariyay Golaha Guud ee Qarammada Midoobay, 10 December 1948.

Cahdiga Xuquuqda Madaniga ah iyo Siyaasadda, soo baxay 16 Decemper 1966, dhaqan-galay 23 marso, 1976.

Dastuurka KMG Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, 01 Agoosto 2012.

Go'aanka Xukuumadda, 09/02/2021, Republic of IRAQ, General Secretariat for the Council of Ministers. Cabinet.iq.

Heshiiska Fiyeena ee Nidaamiya Heshiisyada Dawladaha, la saxiixay 23 May 1969, dhaqangalay 27 Jannaayo 1980.

War Saxafaadeedka Wasaaradda Caafimaadka,16 Maarso 2020. https://www.youtube.com/watch?v=CxQxlRYk8wI Somali National Television (SNTV).

Xeer Madaniga Soomaaliyeed, Xeer N. 27, soo baxay 2 June, 1973, faafinta rasmiga ah sannadka 5aad, Muqdisho, 1 Agosto, 1977-L8- Wakaaladda Madbacadda Qaranka.

Xeerka Badda Soomaaliyeed, Xeer L.5, Soo baxay 1989, ahna wax-kabeddel xeer L. 37/1972-dii.

Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed, X. L.5, Soo baxay 16 Diisambar, 1962, dhaqangalay 3 Abriil 1964.

Xeerka Habka Ciqaabta Soomaaliyeed, X.L. 1 ee 01 Juun 1963.

Xeerka Habka Madaniga Soomaaliyeed, X.L. 19, soo baxay 27 Luulyo 1974.

Xeerka Nidaamka Garsoorka, Xeer lM.3, 12, june 1962

الطبيعة القانونية لجائحة كوفيد 19 من منظور قواعد القانون العام،الدكتورة ظريفي نادية،ط.د. ضياف ياسمينة، جامعة الحقوق والعلوم السياسية، جامعة المسيلة، الجزائرص 20، مجلة المؤتمرات العلمية الدولية، العدد الخامس.

أ ثر جائحة كرونا على المدد التعاقدية والمدد القانونية في قانون المرافعات المدنية، د. علي عبد الحسين منصور الدراجي،رئيس قسم القانون – كلية الكنوز الجامعة العراق، مجلة الفنون والادب وعلوم الإنسانيات والإجتماع، العدد 54-2020.

## About the Author

**Cali Sh. Aadan Yuusuf 'Cali Soomaali' [*Ali Sheikh Adam Yusuf, known as 'Ali Somali'*]** is a legal researcher and professional lawyer. He holds an LLM in public law from Africa International University, an LLB in law from Mogadishu University, and a legal professional certificate from MLCC. He has authored and published numerous papers on Somali legal studies. Ali is a member of several legal institutions, including the International Bar Association (IBA), Arab Lawyers Union (ALU), and Pan African Lawyers Union (PALU).

## About this Journal

***Somali Studies:*** *A Peer-Reviewed Academic Journal for Somali Studies* is a broad scope multidisciplinary academic journal specialized in Somali studies, published annually, in print and online forms, by the Institute for Somali Studies at Mogadishu University. The journal aims to promote a scholarly understanding of Somalia, the Horn of Africa and the Somali diaspora communities worldwide. It is an open access journal, and all articles are freely available to access, print and download from the website of the institute, www.isos.so.

**Disclaimer:** All views and opinions expressed in the article(s) published in *Somali Studies: A Peer-Reviewed Academic Journal for Somali Studies* are the sole responsibility of author(s) of the article(s), and do not necessarily reflect those of the editors, the journal, or the Institute for Somali Studies.

Published by Institute for Somali Studies
Hodan District, Near Km4 Square
Website: www.isos.so
Email: isos@mu.edu.so
Tel/Fax: +252 1 858118
Mogadishu, Somalia